

## 4. GUDDIGA DHULALKA

Talyaaniga dhexdiisa, cidda kaliya ee ka mas'uulka ah baadhitaanka codsigaaga magangelyo waa Guddiga dhulalka ee Aqoonsada Magangelyada Caalamiga ah.

Codsigaaga waxaa lagu baari doona waraysi oo aad xaq u leedahay inaad weydisato inuu joogo tarjume luqaddaada oo jinsi kula ah, lab ama dheddig nooca aad tahay. Waraysiga lagaa qaadayo waxa uu ahaan karaa fideo lagaa duubo. Hadaadan ku raacin, waxaad u Sharrixi kartaa sababaha guddiga go'aanka ka gaaraya codsi-gaada.

Dhamman marxaladahan, gaar ahaan wakhtigan waxaad fursad u haysataa inaad tusto dokumentiyo, Waraaqaha aqoonsiga shakhsiga, shahaadooyin caafimaad, sawir-ro, ama wax kasta oo kale oo aad u aragto inay faa'iido u leedahay codsigaada magangelyada.

Guddiga dhulalka ayaa laga yaabaa inay kuu ogolaadaan qaxootinimo, aqoonsi kalmo, ama ay qaataan go'aan diidmo ah. Arrinta dambe, komishiinku wali wuxuu ku siin karaa nooc kale oo magangelyo ah oo loo yaqaan magangelyo khaas ah, haddii aad ku laabato wadanka-gii asalka ahaa, noloshaada waxay geli kartaa halis.

Haddii aadan ku raacin go'aanka ay qaateen komishiinku, waxaad weli xaq u leedahay inaad racfaan qaadata. Waxaa kale oo aad xaq u leedahay caawimaad sharci oo lacag la'aan ah.



QAXOOTINIMO



AQOONSI KALMO



GO'AAN DIIDMO AH



MAGANGELYO KHAAS AH

## 5. XUQUUQDA KA-FAA'IIDEYSTAHA MAGANGELYA DOONKA

Haddii lagu siiyo nooc ilaallin ah, waxaad xaq u leedahay sharci degaansho oo ku kala duwan muddadu iyadoo loo eeggayo nooca aqoonsiga: shan sanno xaaladaha ilaallinta caalamiga ah, taas oo ah heerka qaxootinimo iyo aqoonsi kaalmo; laba sanno oo xaalado magangelyo khaas ah.

Marka ay kaa dhacayso, waxaad codsan kartaa in lagu cusboonaysiiyo ogolaanshaha degaansho. Waxaad xaq u leedahay inaad shaqayso, waxbarato, oo aad



- QAXOOTINIMO
- AQOONSI KALMO



- MAGANGELYO KHAAS AH

Iyo aad hesho caawimaad caafimaad.

Haddii aad haysato darajo qaxootinimo ama xaalad magangelyo kaalmo, waxaad dalban kartaa dokumenti kuu ogolaanaya inaad ku safarto oo aad ku wareegtid Yurub illaa sagaashan maalmood.

Dokumintigaan wuxuu kaloo ansax ku yahay wadamada aan Yurub ahayn marka laga reebo wadanka aad asal ahaan ka soo jeedid. Marxalad kasta, ka hor inta aad bixin, marwalba wargeli safaaradda dalka aad rabto inaad u safarto.

Waxaa kale oo aad xaq u leedahay inaad ku keento qoyskaaga dalka Talyaaniga si sharci ah oo ammaan ah, adigoo maraya nidaam la yiraahdo isu keenida qoyska.

Xusuusnow, haddii aad shaki ka qabtid wax walba oo nidamka ka mid ah ama aad u baahan tahay macluumaad dheeri ah, waxaad la xariiri kartaa wakiilka sharci-ga ee xarunta aad ku nooshahay, UNHCR, Hay'adda Qaxootiga ee QM, ama hay'ad kale oo ah khabiir ku takhasusay magangelyada sida adiga doontid.



Waxaad xaq u leedahay inaad shaqayso, waxbarato, oo aad hesho caawimaad caafimaad.

## MA U BAAHAN TAHAY MAGANGELYO ?

### 1. WAA MAXAY XUQUUQDA IYO WAAJIBAADKA AJAANIBTU MARKA AY SOO GALAAN TALYANIGA?

Soo dhawow, waxaad soo gaartay Talyaaniga. Taasi sababtu waa inaad ku sugantahay Midowga Yurub. Qof kasta oo yimaada Talyaaniga waa inuu isku soo gudbiyaa mas'uuliyiinta qaranka si loo aqoonsado. Ha ka cabsan booliska, way ku caawinayaan oo ku magangelinhayaan.

Si lagu aqoonsado, waa inaad sheegtaa magacaaga oo buuxa, taariikhda aad dhalatay, dalka aad ku dhalatay, iyo waddanka aad dhalasho ka haysato si sax ah oo dhammaystiran. Haddii aad haysato wax dokumenti ah tus ayaga.

Waa muhiim inaad sheegto haddii ay kula socdaan xubno qoyskaaga ka tirsan. Sidoo kale waa muhiim in aad sharraxdo sababta aad dalkaada uga soo tagtay iyo sababta aad Talyaaniga u soo gashay.

Habka aqoonsiga waxuu ka kooban yahay in sawiro lagaa qaado iyo in faro lagaa qaado. Sidan waa habka ay maraan dhammaan dadka dalka yimaada.

Waa muhiim inaad fahamto waxa laguula soo xariiray iyo in xaaladaadu si saxan loogu qoro dokumentiyada aad saxiixdo. Marka haddi aanay waxba kuu caddayn ama uu shaki kaaga jiro, Waxaad weydiisan kartaa turjumaan in uu ku caawino oo uu kuu caddeeyo.



FONDO ASILO, MIGRAZIONE E INTEGRAZIONE (FAMI) 2014-2020



scan to find information



**HELP.UNHCR.ORG**  
asylum, rights and duties,  
and dedicated service



**TELEGRAM**  
Opportunities, events and  
dedicated service



**JAMAMAP.IT**  
Service mapin 19  
languages

HELPLINE  
**800 905 570**

**9:00 - 5:00 pm**  
From Monday to Friday

[numeroverderifugiati@arci.it](mailto:numeroverderifugiati@arci.it)

[Lycamobile + 39342 775 4946](https://www.whatsapp.com/channel/00299100000000000000)



**IN CASE OF EMERGENCY**

24/7 - free - confidential

Police and Ambulance



112

Antiviolence Helpline



1522

Antitrafficking Helpline



800 290 290

LYCAMOBILE + 39342 775 4946

SOM

Haddii aad ka yartahay 18 jir oo aad kaliga safaraysid, si deg-deg ah ugu sheeg masuul ama qof ka mid ah hay'adaha bini'aadanimo.

Caruurta aan qaan gaarin ee kaligood yimid Talyaaniga, waxay xaq u leeyihiin in la magangeliyo oo la geeyo xarumaha iyaga loogu talagalay. Waxa kale oo ay xaq u leeyihiin inay sii joogaan Talyaaniga lagu caawiyo magangelyo.

Haddii aad qabto dhibaato caafimaad ama aad leedahay baahi gaar ah, si deg-deg ah ula xariir massu-lyiinta ama, haddii la heli karo ha'yaado gargaar.

## 2. HELITAANKA NIDAAMKA

Haddii aad ka cabsi qabtid inaad ku noqoto dalkii aad ka soo jeeday, sababtoo ah noloshada ama mida qoyskaaga ay khatar ku jirto, waxaad xaq u leedahay inaad magangelyo codsato.


Hadaadan haysan wax jinsiyad ah isla markaana aad ka cabsi qabtid in lagu celiyo dalka aad xilligan degga-nashaha ka haysato sababto ah adiga ama qoyskaaga oo halis ku jira, waxaad xaq u leedahay in aad magangelyo codsato.

Haddi hore lagu soo cadaadiyey ama aad ka cabsi qabto in lagu cadaadiyo isirkaaga, dhalashadaada, asalkaaga ama qowmiyaddada darteed, diin, fikrad siyaasadeed, haddii aad ka mid tahay koox bulsho gaar ah oo aad ka cabsi qabto xoog ama lagula kaco fal adoonsasho, haddii aad ka cabsi qabtid in dil lagu xukumo, lagu jir dilo ama aad ka timid dhul ay dagaalo ka socdaan, waad codsan kartaa magangelyo.

Markaad qeexo cabsidaada haddii dalkaaga lagu celiyo, waxaa lagu tixgelin doona qof magangelyo doon ah.

Marxaladdan, haddii loo baahdo waxaad weydiisan kartaa in lagu martigeliyo xarunta soo dhaweynta.

Si codsigaga lagu diiwaangeliyo magangelyo doon, waa inaad la xariirta Booliska Talyaaniga. Codsigada markaas waxaa loo gudbin doonaa guddi gaar ah kuwaas oo ku shaqo leh qiimaynta codsigada.



Xafiiska socdaalka ee Booliska, oo uu kula socdo tarjuman luqaddaada ah, ayaa kaa caawini doona buuxinta foomka C3, kaas oo ka kooban macluumaadkada shaqsi sida kooxdaada qowmiyadeed, luqaddaada, iyo diintaada.

Xaaladdan, masuulka waxay ku weydiin doonan sida uu ahaa safarkagii aad Yurub ku timid, haddii dalkaagii lagu soo xiray, laguugu jir dilay, dhibaatooyin iyo waxyaallo kale ama intii aad safarka ku soo jirtay, haddii aad ka mid ahayd koox siyaasadeed, haddii ay xubno ehelkaaga ah joogan Talyaaniga ama Yururbta kale iyo haddii aad wax dokumenti aad sidatid.

Haddii aad qabto dhibaato caafimaad ama baahi gaar ah, waad ka hadli kartaa hadda iyo mar kasta inta lagu gudo jiro nidaamka. Xaqiidad, haddi ay ku hayaan cudurro daran ama culays maskaxeed, ama lagu soo jir dilay, kufsaday, ama noocyo kale oo halis nafsiyeed ah, mid jireed ama xadgudub khabsasho ah, waxaad xaq u leedahay inaad hesho caawinad kugu haboon iyo adeegyo gaar ah.


Marxaladdan, si cad u sharrax sababta aad magangelyo u codsanayso. Haddi aad rabtid, waxaad sababaha oo dhan ku soo gudbin kartaa qoraal ahaan.

Waa muhiim inaad fahanto waxa lagu leeyahay iyo in codsigada si saxan foomka loogu qoro. Haddii ay jiraan waxyaabo aan caddeyn, turjumaanka inuu kuu caddeeyo wixii laguugu yiri.

Dhammaadka waraysiga, waxay ku weydiin doonaan inaad saxiixdo foomka waxaana lagu siinayaa koobi. Meel wanaagsan ku xafido.

Dhammaan warbixinnada aad bixiso ayaa waxaa loola dhaqmi doonaa sirta ugu sareysa isla markaana lama wadaagi doono mas'uuliyiinta wadanka aad ka soo jeedo, ama waddan saddexaad.

Xaaladaha qaarkood, codsigada magangelyada waxaa lagu qiimayn karaa hannaan dhakhsiyo leh oo degdeg sare ah waxana uu wataa shuruudo gaaban. Dhibaatooyinka caafimaad ama baahiyaha gaarka ah, waxaad xaq u leedahay in mudnaanta koobaad la siiyo baaritaanka codsigada. Xasuusnow, haddii aad warbixin dheerad ah u baahantahay, waxaad la xariiri kartaa aqoonyahanka sharciga ee xarunta ama xafiiska Socdaalka.



Haddi ay ku hayaan cudurro daran ama culays maskaxeed, ama lagu soo jir dilay, kufsaday, ama noocyo kale oo halis nafsiyeed ah, mid jireed ama xadgudub khabsasho ah, waxaad xaq u leedahay inaad hesho caawinad kugu haboon iyo adeegyo gaar ah.



## Magangelyo

Magangelyo doon ahaan, waxaad xaq u leedahay, haddii aad u baahato, in lagugu soo dhaweyyo xarun gaar ah, in lagu siiyo deganaansho ku-meel-gaar ah oo aad ku sii joogi kartid Talyaaniga inta la baarayo codsigaga.

Xusuusnow, ilaa iyo inta aad tahay magangelyo doon kama bixi kartid dhulka Talyaaniga.

Laba bilood kadib markii la qoray C3 waxaad xaq u leedahay inaad ka shaqeyn karto Talyaaniga.

Xasuusnow, inta lagu jiro nidaamka, waxaad xaq u leedahay inaad la xariirto UNHCR, Hay'adda Qaxootiga ee QM, ama hay'ad kale oo khabiir ah ah magangelyo doonka, sidaa adiga doonto.

## 3. XEERKA DUBLIN

Waqtiga aad joogtid waddankan Talyaanigu waxaad u xilsaaran yahay inuu ku magangeliyo, sidaa darteed inuu diiwangeliyo codsigaga magangelyo.

Guud ahaan, dalka ka mas'uulka ah qiimaynta codsigada magangelyo waa dalkii aad markii ugu horeysay ka soo gashay Yurub. Si kastaba, haddii aad leedahay xubno qoyskaaga ka mid ah oo ku nool dalalka kale ee Yurub, ama haddii aad haysatid dukumentii ay bixiyeen dalal kale oo Yurub ah, codsigaga waxaa baari karo waddamo kale oo Yurub ah, halkaaso sharci ahaan si nabdoon laguugu wareejin karo.

Sababtan, waa muhiim inaad wargeliso masuullinta sida ugu dhaqsiiyaha badan haddi waddamada kale ee Yurub ay joogan xubno kale oo qoyskaada ah.

Habkan waxaa loogu yeera "Xeerka Dublin", ujeeddada kaliya ee laga leeyahayna waa in la aqoonsado dadka ay hawshaada magangelyo doonka ah ay ka dhici doonto, laakiin ma daboolayso sababaha aad magangelyada u codsatay. Xeerka Dublin wuxuu khuseeyaa dhammaan waddamada xubnaha ka ah Midowga Yurub iyo sidoo kale Norway, Iceland, Switzerland, iyo Liechtenstein.



Xusuusnow, ilaa iyo inta aad tahay magangelyo doon kama bixi kartid dhulka Talyaaniga.

